





Fasalka 1aad

HEERARKA HAGISTA QOYSKA EE MINNESOTA

Waxa ay tahay in canugaaga ogaado
Hawlaha iyo tusaalooyinka ELA & Xisaabta
Qaababka loola hadlo macalimiinta



great
MN
SCHOOLS




Ku saabsan hagahan


Qoysaska waxay doonayaan in aya ogaadaan waxa canugooda uu ka baranaayo iskuulka. Waxay u yihiin canugooda maaclinka ugu horeeya uguna muhiimsan.

Waaxda waxbarashada Minnesota ayaa go'aamisa waxa canug walba uu ka baran doono iskuulka dhamaan xiisadaha. Hagahani wuxuu kaa caawiyaa in aad ku fahamto heerarkaas farshaxanka luqada ingiriiska (ELA) iyo Xisaabta. Tani waxay kaa caawin doontaa in aad saaxiib dhow lanoqoto canugaaga macalinkiisa si aad u caawiso waxbarashada inta lagu gudajiro fasalka 1aad.

KAHOR INTA AADAN BILAABIN

Kahor inta aanan dib u eegis ku samayn hagahan, waxaan idinku dhiirigelinaynaa in aad qiimeeysaan heerka ardaydiina ay ka taagan yihiin fasalka belearninghero.org/readiness-check-mn.





Hagahani waxaa ku jira



Waxa ay tahay in canugaaga ogaado uuna aboodi karo in uu sameeyo–

BOGGA 4 WAA ELA IYO BOGGA 10 WAA XISAABTA

Nuxurka ugu muhiimsan (Aqoon iyo xirfad) ee ardayda ay ka baranayan dhamaadka fasalka kowaad



Tusaalooyinka ELA–

BOGGA 6

Shaqo tusaale ah ee canugaaga ay tahay in uu qoro dhamaadka fasalka 1aad



Hawsha maalinlaha ah ee lagu taageero waxbarashada–

BOGGA 7 WAA ELA IYO BOGGA 12 WAA XISAABTA

Qaababka aad ku caawin karto canugaaga in uu barto nuxur muhiim ah iyo xirfada farshaxanka luqada ingiriiska (ELA) iyo xisaabta



Qaababka macalimiinta loo la hadlo–

BOGGA 8 WAA ELA IYO BOGGA 13 EE XISAABTA

Sida adiga iyo canugaaga macalinkisa aad si wadajir ah ugu wadashaqayn kartaan si canugaaga uu u horumaro



Qaamuuska ereyada waxbarashada–

BOGGA 14

Qeexida ereyo aqooneedka guud ee quseeeya faasalka 1aad



Farshaxanka luuqada ingiriiska

**WAXA AY TAHAY IN
CANUGAAGA OGAADO UUNA
AWOODI KARO IN UU SAMEEYO**

Marka la dhiganayo fasalka 1aad, diirada ELA waa in la xoojiyo xirfadaha aasaasiga ah ee qoraalka. Ardayda sidoo kale waxay dhisayaan aqoon iyo ereyo ayaadoo loo maraayo wax aqrin. Waa in ardayda ay si madax banaan u aqriyaan (ayadoo ay jirto taageero sidii loo baahnaa ah) iyo in ay dhagaystaan qoraalada kor loo aqriyo. Qoraalada waa in ay ahaadaan kalabar mala-awaal barka kalena aan mala-awaal ahayn. Qoraalada waa in ay matalaan dad kala duwan, aragtiyo, iyo aqoonsiyo oo ay ku jirto codka iyo aragtitada taariiqiga ah iyo mida casriga ah ee dadka Dakota iyo Anishinaabe.

Si aad u aragto dhammaan heerarka gobolka ELA ee fasalka 1ka fiiri halkan: [education.mn.gov/mde/dse/stds/ela](https://mn.gov/mde/dse/stds/ela).

Koowaadka, waa in ay fahmaan sida si fiican loogu sameeyo waxayaabaha soo socda dhamaadka sanadka:

BARASHADA QORIDA IYO AQRINTA

- ✔ Xarfaha xisaabta iyo dhawaaqa la kala saaro loona qoro ereyo ahaan ee leh 1-2 shibbanayaal

punt	paint	put	picnic
wood	want	wool	wet
foil	food	finish	fed
clam	credit	coil	cloud
foil	fall	for	fell
mouth	moist	mascot	moth
solid	shine	soil	shoot
look	lake	loot	limit

- ✔ Aqri, higaadi, si wanaagsan na u isticmaal ereyada isku haya luqada. Tusaale ahaan, "a", "the", "to", "of", "from", "is", "are"
- ✔ Aqri qoraalada la kala saari karo si aqrinta ay u noqoto mid toosan¹
- ✔ Si wanaagsan u qor oo leh jumlado dhamystiran



WAX KA OGAANSHAHA DUNIDA AYADOO LOO MARAAYO QORAAL

- ✔ Suaalaha weydiinta iyo jawaabaha ku saabsan qoraalada dib u sheeg wixii dhacay sharaxna fikradaha muhiimkaa ah. Tani waxaa laga yaabaa in ay ku jirto higaad hal-abuur ah²
- ✔ Fahan micnaha erayada aan la garanaynin adiga oo isticmaalayo sawiro, qoraalo
- ✔ Isticmaal sawir iyo qoraal labaduba si loo soo bandhigo wax cusub oo ay ka barten qoraalka ama wax moowduuca ku saabsan Waa in ay jirtaa moowduuc cad iyo xaqiiqooyin ku saabsab moowduuca

TUSAALOYINKA FARSHAXANKA LUUQADDA INGIRIISIGA FASALKA 1AAD



Hoos waxaa yaal tusaale qoraal ah oo la badali karo oo ah heerka fasalka kooraad (qoraalkan waxa lagu muujin doonaa buuggan oo dhan iyo sawiro). Carruurta waa in ay helaan qoraallada noocan ah ee la badali karo si ay meesha uga saaraan mashquulinta sida lama filaanka ah kala kulmaan higgada isla socota ee aan la baranin. Qoraallada kuwan oo kale ah waa inay ku jiraan sawirro oo keliya hal ama 2 jumlad boggiiba.

The Hares and the Frogs

Three hares stood in the grass. “I am sad,” one of them said. “I wish we were brave.” “So do I,” said the next one. “But we are not brave. A splash in the brook scares us. The wind in the grass scares us. We are scared all the time.” “Yes,” said the last one. “It is sad to be a hare.”

Just then there was a splash in the brook. The splash scared the hares. They ran off to hide. As they ran, they scared a bunch of frogs. “Look,” said one of the hares. “The frogs are scared of us!” “Yes, they are!” said the next hare. “They are scared of us! Well, I’m glad I am not a frog!” “Yes!” said the last hare. “In the end, it is good to be a hare!”²

Hoos waxaa ku yaal tusaale qorista heerka fasalka 1aad.³

CHESTER’S WAY

Chester’s Way by Kevin Henkes is a **Magacowga Mawduuc**
storey about two mice named
Chester and Wilson. They are best
friends. They played with echether. **Dig ugu sheekeeya**
They remgndid echether to wear
sunscreen. They rode bikes with
echother. The drest the same way for Halloween.
Chester and Wilson were **probely best friends** **Higaada Hindise**
forever. I have a best friend his name is Chris
we like to taking **trns paying at our house.** **Higaada Hindise**



HOWLAHA MAALINLAHA AH EE LAGU CAAWIYO WAXBARASHADA

Maalin walbo isla aqrista ilaa 20 daqiiqo. Ka hadla waxa ay aqrinayaan, ka doodayaan, iyo wax ka qorista iskuulka

- Kudar caruurta guriga jooga ee maalin walbo u baahan aqrinta, sida cunta karinta, adeegashada, kala saarista iimeelada
- Hayso caruur u qorta qaraabada qoraalo iyo warqado
- Dhagayso canugaaga oo aqrinaya hadana dib uqrinaya qoraalka lakala saari karo. Waa in ay ku dhawaaqaan erey walba kadibna ay awoodi karaan si hagaagsan oo cad u aqrin karaan. Ha u ogolaanin canugaaga in uu fiiriyo sawirada uuna qiyaaso sawirada. Hubi in ay ka shaqaynayaan in ay ku dhawaaqaan kadibna si hagaagsan ugu dhawaaqaan ereyada leh dhawaaqyo iyo higaadyo ay bardeen
- Hayso “buuga hadalka” wadasheekaysiyada. Waydii canugaaga in uu ku sheego fikradaha ugu muhiimsan ereyo ay aiaga leeyihiin. Waydii canugaaga in uu ku tuso halka laga helo fikrad walba ee ku jirta qoraalka
- Doorta wax la isla barto. Aqri buugaag, fiiri onleenka, oo si wadajir ah wax iskula sameeya si aad waxbadan uga barataan moowduuca la doortay. Waad caawin kartaaa canugaaga in uu dhiso aqoon uuna jeclaado waxbarashada
- Ku dhiiri geli canugaaga in uu bilaawo qorida dhabta ah. Tani waxaa ku jiri karta qoraal qorista maalinlaha ah, joornaalo ereyo leh iyo sawiro, ama qoraal kale oo hal-abuul leh



¹Qoraalada la higaadin karo oo lagu hely ogolaansho ka timid Core Knowledge Language Arts Curriculum. “CKLA Unit 1.” <https://www.coreknowledge.org/curriculum/download-curriculum/>

²Muunad qoraal oo lagu helay ogolaansho ka timid arday saaxibadood. “Student Writing Samples.” Achieve the Core, <https://achievethecore.org/category/330/student-writing-samples>

³Shaqadani waxay ku salaysan tahay shaqadii asalka ahayd ee Core Knowledge® Foundation oo lagu helay shati siinta hoos timaada Creative Commons AttributionNonCommercial-ShareAlike 3.0 Unported License. Tani sinaba macnaheedu ma ahan in Aasaaska Aqoonta Muhiimka ah ay ayidayso shaqadan.



SOO JEEDIN

QAABABKA LOOLA HADLO MACALIMIINTA

1. Maxay tahay canugayga awoodihiisa, sideena ugu adeegsadaa tilmaamaha?
2. Sidee u dooraata qoraalada? Miyuu canugayga arki doonaa xarfo & mowduucyo ayaga matalaya, taariikhdooda, & aqoonsigooda. Miyay baran doonaan fikrado cusub kuna saabsan xarfo kala duwan ayadoo loo maraayo qoraalada fasalka?
3. Ma itusi kartaa natiijada qiimeynta aqrinta ugu dambaysay ee canugayga?
4. Xarfahee iyo condkee ayay tahay in canugayga uu si fiican u yaqaano xiligan oo kale? Miyuu canugayga bartay dhawaaqyadaan? Miyuu helayaa canugayga fursada uu ku aqriyo qoraalada ka caawinaya in ay ku celceliayan fasirida dhawaaqyada ay iyaga baranayaan? Ka hadal waxa aad ku guriga ku aragto
5. Maxay tahay mowduucyada ay caruurta ku baranayaan aqriska. Maxay tahay in canugayga uu fahmi karo, qori karo kana hadli karo taasoo ka dhalanaysa natiijada waxay aqriyeen? Mowduucyadee ku jira taariikhda? Mowduucyadee ku jira sayniska?
6. Miyuu canugayga awood u leeyahay inuu hadlo, wax sawiro, ama uu u qoro habab ku tusinaya in ay fahmeen waxa ay aqrinayaan ama ay waxa ka baranayaan. Hadii aysan sidaa ahayn, maxaa caqabad ku aha iyaga?
7. Buugaag nooc ee ah ayuu canugayga aqrinayaa inta lagu gudajiro aqrinta madaxa banaan? Miyaa lagu xadeeyay heer wax aqrin gaar ah?
8. Miyuu canugayga haystaa fursad uu si joogta ah fasalka dhexdiisa wax ugu qoro? Miyuu canugayga si nadiif ah wax u qorayaa iyo si sharci ah, iyo jumlado aan dhamaystirnayn? Ma bixin kartaa muunad qoraal oo canugayga leeyahay?

Waalidiinta


Macalimiinta



10s



5s



Xisaab

**WAXA AY TAHAY IN CANUGAAGA
OGAADO UUNA AWOODI KARO
IN UU SAMEEYO**

Inta lagu jiro fasalka koowaad, ardaydu waxay sii dheereeyaan fahamkooda isku-darka & kala-goynta. Waxay bilaabaan inay sahamiyaan isla'egyada, qiimaha tirada, & cabbirka.

Si aad u aragto dhammaan heerarka xisaabta gobolka ee fasalka Xka fiiri halkan:
education.mn.gov/MDE/dse/stds/Math

Ardayda fasalka 1aad waxay waqtigooda inta badan ku bixin doonaan barashada moowduucyadan soo socda. Waa in ay si fiican u fahmaan dhamaadka sanadka.

BARASHADA XISAABTA EE FASALKA 1AAD


- ✔ Ka shaqay iskudarka iyo kalajarka suaalaha mas'alooyinka ah ee leh tiroonyinka ilaa 20
- ✔ Si maskax ahaan iskugu dar caddada 10 ama wax ka yar. Si maskax ahaan ukalajar tiro 10 ama ka yar
- ✔ Soosaar tirada maqan ee ku jirta isla-egta asaasiga ah. **Tusaale ahaan, $3 + _ = 7$**

$$3 + _ = 7$$

- ✔ Fahan waxa loola jeedo godadka ku jira tirooyinka laba godlaha ah. **Tusaale ahaan tirada 42 waxaa loola jeedaa 4 oo tobanaad ah iyo 2 oo koowad ah**

4 **2**
— **—**
tens ones

- ✔ Kudar labo, tirooyinka laba godlaha ah adoo iskudaraya tobanaad + tobanaad + kowaad
- ✔ Ku cabir dhererka walxaha adoo u isticmaalaya shay gaaban halbeeg cabir ahaan. **Tusaale ahaan, "Meeqo qalin qori ayuu dherer ahaan yahay miiskan?"**





HOWLAHA MAALINLAHA AH EE LAGU CAAWIYO WAXBARASHADA

- Kabood tirinta horay iyo gadaal min 2s, 5s, iyo 10s ugu yaraan 120. Hees, dhaqaaq, ama ciyaar markaad tirinayso. Tani waxay caawinaysa xasuusta
- Nollosha maalin walba, waydii suaalaha iskudarka iyo kalajarka mudo 10 gudohood. **Tusaale ahaan, "Waxaa kuugu jira boorosada saddex qalin qori, anigana waxaa iigu jira boorsada lix qalin qori. Meeqo qalin qori ayaan haysanaa marka la iskudaro dhamaan?"**

$$3+6=$$

- Ku celceli adoo isticmaalayo ereryo lagu sharaxayo cabirka tirooyinka **Tusaale: "Tirada saxamada waxay la egyihiin tirada galaasyada." "Tirada digirta ayaa ka badan tirada baastada"**
- Baraatikeey iskudarka. Kudar koowaad + koowaad iskudar tobanaad + tobanaad sida $39 + 14$

$$39+14=$$


- Baraatikeey sheegista waqtiga saacad iyo saacad barkeed
- Qadaadiicda ukala saar diinaar, nikel iyo dimes. Raadi qiimaha koox qadaadic ah, ilaa hal doolar
- Aqri buugaag ay ku jiraan moowduucyada cabiraada. Canugaaga ha doorto walxaha agagaarka guriga hana isu barbar dhigo dhererka
- Isla ciyaara ciyaarta turubka iyo safiitada geemka kuwaa oo u isticmaala xisaabta xeelada ama dhibco kordhin
- La kari cuntada canugaaga weydiina iyaga in ay kaa caawiyaan tirinta, iskudar, isku barbardhig caddada maadooyinka cuntada




QAABABKA LOOLA HADLO MACALIMIINTA

1. Tiro su'aalo nooc ee ah ayay caruurta baranayaan si ay uga shaqeeyaan sanadkan?
2. Ma itusin kartaa natiijada imtixaanka xisaabta canugayga ee ugu dambaysay?
3. Sidee canugayga uu horumar uga sameeynayaa fahamkooda ku aadan nuxurka ugu muhiimsan ee fasalka? Mala wadaagi kartaa waxcusub oo gaar ah?
4. Sidee canugayga uu u wajahaa shawooyinks xisaabta adag? Sideen ugu dhiirrigelin karaa in ay bartaan nuxur adag?
5. Maxaa la gudboon in canugayga uu fahmo oo uu ka hadlo wuxuu bartay?
6. Canugayga maku tusi karaa in ay iyaga fahmayaan waxa ay barten? Haddii aysan sidaa ahayn, maxaa caqabad ku ah iyaga? Sideen ku caawin karaa?
7. Sideen ugu dhigi karaa barashada xisaabta mid wanaagsan?

Suaalo?





Qaamuuska ereyada waxbarashada

Aqoonyahanada waxay isticmaalaan ereyo micno gaar ah kuleh iskuulaadka. Fahamka ereyadaas waxay kaa caawin doonaan in aad la hadasho macalinka.



ISUGEYNTA



Isugeynta waa marka aan helno wadarta anagoo isku geynayna laba qiimo ama in kabadan. Isku darida 2 & 3 waxay ina siinaysaa wadar ahaan 5. isku darida 4, 1, & 3 waxay ina siinaysaa wadar ahaan 8. Marka la isku daro, wadarta guud waxay noqotaa mid badan.

KALASAAR



Adigoo isticmaalaya xiriirka xarfaha iyo dhawaaqa ee sida saxda ah loogu dhawaaqo ereyada. Tusaale ahaan, caruurta baratay dhawaaqa ingiriiska /a/, /c/, & /t/ way kala saari karaan "cat."

QORAALADA LAKALA SAARI KARO



Buugagta leh dhawaaqa iyo higaada isla socda ee macalimiinta horay ugu bareen fasalka. Ardayda way kala saari karaan ama ku dhawaaqi karaan ereyada intooda badan ee ku jira qoraalka.



HIGAAD HAL-ABUUR LEH

Markay ardayda baranayaan qorida, waxay qoraan dhawaaqa ay maqlaan. Waxaa laga yaabaa in aysan si sax ah u higaadinin ereyada. Tani waxay macalimiinta ugu yeeraan “Higaad hal-abuur leh”. Ardayda waxay isticmaalaan iskuxerka xarfaha iyo dhawaaqa lagu baray iskuulka si ay ugu dhawaaqaan ereyo.

HEERKA AQRINTA

Inta badan macalimiinta waxay ku cabiraan heerka wax aqrineed ee ardayga, badanaa waxaa lagu asteeyaa xaraf ama tiro. Tani waxay macalinka ka caawinaysaa waxa ardayda u baahan yihiin in ay bartaan. Laakiin mararka qaar, caruurta waxaa loo ogolyahay keliya in ay aqriyaan qoraalo heerkaas ah. Ka digtoonow baraatikeeyn tan. Ardayda waa in aan lagu xadaynin aqrinta qoraalada heerkoda keliya ah ama ka hooseeya ujeedada heerka fasalkooda.

KALAJARKA

Kala goyntu waa marka aynu wax ka qaadno tirada wadarta . Haddaynu ku bilowno 7 oo aynu ka jarno 4, waxa inoo haraysa 3. Marka aan wadarta wax ka jarno ay yaraanaysa.

EREYADA ARAGA


Ereyo kasta ee canug uu si dhaqsi ah oo dabiici ah u aqrin karo. Tusaale ahaan, “to”, “the,” “at.”

TIXRAACYO

Waaxda heerarka waxbarashada ee Minnesota <https://education.mn.gov/mde/dse/stds>

Raadi hagis guud oo qoyska sal u ah <https://seekcommonground.org/family-guides>

Manhajka cilmiga farshaxanka luqadaha <https://www.coreknowledge.org/curriculum/download-curriculum/>



QORAALO

Handwriting practice lines consisting of a solid top line, a dashed middle line, and a solid bottom line. There are six sets of these lines arranged vertically on the page.



Waxaa kuu keenay ururka aan faa'iido doonka ahayn, Dugsiyada Great MN. Ogow waxbadan & oo ugu deeq greatmnschools.org.

Nala wadaag waxa aad ku samaysay gaadkan!

